



Tixraac: SSC/WM/XW/XN010/2024

Taariikh: Meey 1, 2025

XEER-NIDAAMIYAHA XAFIISKA XISAABAADKA GUUD (XXG),

Isagoo fulinaaya mid ka mid ah ujeeddooyinka lagu sheegay Qodobka 2 (4) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud oo tilmaamaya in la sameeyo nidaam cad oo lagu maamulo Maaliyada Maamulka si loo hubiyo isla xisaabtan dhamaystiran, isla markaana loo sharciyeeyo qaabka ugu haboon ee diyaarinta iyo isticmaalka Miisaaniyada Maamulka SSC-Khaatumo.

Isagoo u hoggaansamaya awoodadaha lagu sheegay Qodobka 8(1) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyadda masuul ka yahay dhammaan siyaasadaha iyo xaaladaha farsamo ee la xiriira habsami u socodka Nidaamka Maamulka Maaliyadda Maamulka iyo taabagalinta dhamaan agabyadda iyo dukumiintiyada uu dalbanayo Xeerkan.

Markuu arkay Qodobka 9 (1) xarafka L ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud: Xeer 1/2023 oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyaddu sameeyo nidaam isku xiran oo ku haboon xakamaynta kharashyada iyo dhacdooyinka kale ee dhaqaale ee lagu galay miisaaniyada Maamulka, sidoo kale maamulka lacagaha.

Markuu arkay Qodobka 46(11) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud: Xeer 1/2023 oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyaddu aasaasaayo xarun dhexe oo xisaabaadka ah taasoo shaqooyinkeeda lagu qeexi doono xeer-nidaamiye ka farcamaya Xeerkan.

Markuu arkay Qodobka 21(3) ee Axdiga Maamulka SSC-Khaatumo, oo tilmaamaya in Xafiiska Xisaabaadka Guud uusan ka mid ahayn xafiisyada madaxa bannaan.

Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu wuxuu soo saaray Xeer-nidaamiyahaan:

Qodobka 1aad:

Ujeeddada Xeernidaamiyaha

1. Ujeeddada Xeernidaamiyahani waa in lagu nidaamiyo shaqada Xafiiska Xisaabaadka Guud, iyadoo la hubinayo in uu si hufan uga shaqeeyo maaraynta iyo dabagalka xisaabaadka maaliyadda Dowladda.

Qodobka 2aad:

Magacaabista Xisaabiyaha Guud

1. Madaxweynaha Dowladda SSC-Khaatumo ayaa magacaabaya Xisaabiyaha Guud, iyadoo la tixraacayo soo-jeedinta Golaha Wasiirrada, wuxuuna toos u hoos tegayaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.
2. Xisaabiyaha Guud waxa uu noqonayaa qof khibrad iyo aqoon durugsan u leh maamulka xisaabaadka iyo maaliyadda.
3. Xisaabiyaha Guud waa in uu ahaadaa mid leh karti, daacadnimo, iyo xirfad ku filan oo ku habboon xilka.

Qodobka 3aad:

Qaabdhismeedka Xafiiska Xisaabaadka Guud

1. Xafiiska Xisaabaadka Guud wuxuu ka mid noqon doonaa qaab-dhismeedka Wasaaradda Maaliyadda, wuxuuna fulin doonaa xeerarka, xeernidaamiyeyaasha, habraacyada iyo wareegtooyinka uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.
2. Xafiiska Xisaabaadka Guud waxaa uu ka koobnaan doonaa qaybo kala duwan oo u xilsaaran:
 - a. Qaybta Khasnadda iyo Lacagta
 - b. Qaybta Dabagalka Xisaabaadka
 - c. Qaybta Warbixinnada
 - d. Qaybta Dabagalka Hantida Dowladda
 - e. Xisaabiyeyaasha Gobollada
3. Qaabdhismeedka Xafiiska Xisaabaadka Guud waxaa lagu salayn doonaa baahiyaha shaqo ee iyo heerka maaliyadeed ee Dowladda.

Qodobka 4aad:

Shaqada Xafiiska Xisaabaadka Guud

1. Hubinta in dhammaan xisaabaadka dowladda lagu maamulo si waafaqsan shuruucda iyo nidaamyada maaliyadeed ee Dowladda.

2. Diyaarinta warbixinnada sanadlaha ah ee maaliyadeed ee Dowladda.
3. Kormeerka iyo dabagalka isticmaalka miisaaniyadda Dowladda.

Qodobka 5aad:

Magacaabista Xisaabiyeyaasha Gobolada, Degmooyinka iyo Kuwa Idman

1. Xisaabiyaha Guud wuxuu magacaabayaa Xisaabiyeyaasha Gobolada iyo Degmooyinka iyo hadii loo baahdo Xisaabiyeyaal Idman, kadib marka uu kala tashado uuna ansixiyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyadoo la raacayo habraacyada sharci ee Wasaaradda Maaliyadda.
2. Xisaabiyeyaasha Idman, kuwa Gobolada iyo Degmooyinka waa in ay buuxiyaan shuruudaha aqooneed iyo kuwa xirfadeed ee looga baahan yahay darajada ay ku shaqeynayaan.

Qodobka 6aad:

Shaqaaleysiinta Xafiiska Xisaabaadka Guud

1. Shaqaaleysiinta Xafiiska Xisaabaadka Guud waa in ay ahaataa mid ku saleysan hufnaan, cadaalad, iyo karti shaqo.
2. Habka shaqaaleysiinta waa in loo maraa sida ay dhigayaan xeerka shaqaalaha rayidka ah, xeer-hoosyada Wasaaradda Maaliyadda.
3. Shaqaalaha waa in ay maraan imtixaano aqooneed iyo xirfadeed oo lagu hubinayo tayadooda.
4. Xafiisku waa in uu dhiirrigelinayaa dhisidda xirfadaha shaqaalaha, isagoo siinaya tababaro joogto ah.

Qodobka 7aad:

Miisaaniyadda Xafiiska Xisaabaadka Guud

1. Miisaaniyadda Xafiiska Xisaabaadka Guud waxay ka tirsanaan doontaa Miisaaniyadda Wasaaradda Maaliyadda.
2. Icticmaalka miisaaniyadda waa in uu waafaqsan yahay qorshaha iyo shuruucda maaliyadeed ee Wasaaradda Maaliyadda.

Qodobka 8aad:

Shuruucda Xafiiska Xisaabaadka Guud

1. Xafiiska wuxuu ku shaqeyn doonaa shuruucda iyo xeer-nidaamiyeyaasha u degsan maamulka maaliyadda Dowladda, wuxuuna fulin doonaa xeerarka, xeer-nidaamiyeyaasha, habraacyada iyo wareegtooyinka uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.
2. Dhammaan qaybaha iyo shaqaalaha waa in ay u hoggaansamaan nidaamyada sharci ee Wasaaradda.

Qodobka 9aad:

Hannaanka Xisaabeed

1. Sida uu qeexayo Qodobka 8(1) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyadda masuul ka yahay dhammaan siyaasadaha iyo xaaladaha farsamo Nidaamka Maaliyadeed ee Dowladda, waxaa dhammaan hannaanada xisaabeed iyo kuwa maamul gacanta ku hayndoona Wasiirka waxaana lagu hagi doonaa siyaasadda uu u dejiyo.

Qodobka 10aad:

Warbixinta Maaliyadeed

2. Xisaabiyaha Guud wuxuu si joogta ah u siin doonaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Warbixinta Maaliyadeed iyo midda xisaabeed ee Dowladda.
3. Xisaabiyaha Guud wuxuu siin doonaa Wasiirka warbixin iyo xisaabxidda maalinle ah, mid toddobaadle ah, mid bille ah, mid saddex biloodle ah iyo mid sannadle ahba.
4. Sannad xisaabkeeda dowladdu wuxuu ka bilaabmayaa 1da Janaayo wuxuuna ku dhammaanayaa 31ka disembar ee sanand kasta.

Qodobka 11aad:

Waqtiga Warbixinta Xisaabaadka

1. Xisaabiyaha Guud wuxuu warbixinta xisaabaadka ku soo gudin doonaa sida ku cad jedwelka hoose:

NOOCA WARBIXINTA AH	WAQTIGA KAMA DAMBEYSTA AH
1. Warbixinta Maalinlaha ah	Maalinta Xigta 10am
2. Warbixinta Toddobaadlaha ah	Maalinta Sabtida 10am
3. Warbixinta Billaha ah,	Bisha Xigta 5teeda 10am
4. Warbixinta Saddex Biloodlaha ah	Bisha Xigta 5teeda 10am
5. Warbixinta Sannadlaha ah	Sannadka Xig Bisha 3aad 31keeda

Qodobka 12aad:

Dhaqangelinta Xeernidaamiyaha

5. Xeernidaamiyahani wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Dowladda SSC-Khaatumo, waxaa lagu faafinaya mareegta (website) Wasaaradda Maaliyadda.

Cabdiqani Xuseen Xaaji Hiiraan

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Dowladda SSC Khaatumo

Saxeex: 

